INDHAHA SOOMAALIYEED

26 April 2023

Kacaanka warshadaha & wax soo saarka Dalka

Shillin diid
Dollar doon
?



Ganacsiga Soomaaliyeed &
Qarniga 21aad

INDHAHA SOOMAALIYEED

26 April 2023

INDHAHA SOOMAALIYEED

26 April 2023

Copyright© 2023. Talk with Majid

Xuquuqda daabacaadda Majaladan waa mid dhowrsan si kale looguma xad gudbi karo, iyadoon oggolaanshiyo laga helin soo-saara-yaasha Majaladan

Waxaa lagu daabacay Muqdisho, Soomaali-ya Daabacaadda koowaad 2023, waxaa daabacay shirkadda daabacaadda ee BrandSom.

TUSMADA

01 Hordhac

03 Ganacsiga Soomaaliyeed

11 Shillin Diid

13 Dollar Doon





INDHAHA SOOMAALIYEED

26 April 2023

17 Wax soo saarka Beeraha

19 Doorka warshadaha

23 Hayaanka Ganacsiga Soomaaliyeed

HORDHAC



1.1 QEEXISTA MAJALADDA

Majalladan oo loogu magac daray Indhaha-Soomaaliyeed, waa majalad bil-le ah oo kasoo baxda gudaha dalka Soomaaliya gaar ahaan magaalada Muqdisho. Waxa ay Majalladan kusoo baxda seddex luuqadood oo kala ah (Soomaali, Ingiriisi iyo Carabi).

Majalladan, waxa lagu soo bandhiga dhinacyada kala duwan ee iskugu jira cilmi-baarisyada ka kooban heerarka ganacsiyada, caafimaadka, waxbarashada, madadaaladda wax-tarka leh, dhaqanka iyo Diinteenna suuban.

Xogta bil-laha ah ee ku xusan Majalladan, waxa lagu soo bandhiga baraha bulshada, si ay u gaarto farinta inta daneysa akhriska, waxa ay ka heli karaan dhammaan goobaha akhriska, sida:- maktabaddaha akhriska, maktabaddaha ay leeyihiin goobaha waxbarasho, goobaha lagu kulmo ee u diyaarsan wax-akhriska iyo baraha bulshada.

1.2 SOO-SAARAHA MAJALLADA

Waxa Majalladan soo saara xarunta akhriska iyo qoraalka ee La-hadal Majid oo muddo Afar sanno kasoo shaqeeysay wax qorista iyo kobcinta maanka akhristayaasha. Xarunta waxa ay si joogta usoo saarta maqaallo kala duwan oo ka kooban cilmi-baarisyo soo gudbinaya ciwaanada ugu muhiimsan ee loo baahan yahay in la lafo-gurro, waxaana lagu soo bandhiga barta website-ka ee www.talkwithmajid.com

Xarunta oo kaashanaysa shirkada daabacaaddaha casriga ee Brand-Som, waxa ay si wada jir uga shaqeynayan soo saarista Majaladdan. Shirkada BrandSom oo in muddo ah kasoo shaqeysay bixinta adeegyada la xiriira daabacaaddaha khibrad dheeri ahna u leh, waxa ay udub-dhexaad u tahay sidii Majalladan loo daabici lahaa loona gaarsiin lahaa bahda la nool akhriska.

> Hadafka soo-saara yaasha Majallada, waa in la helo meel lagu kulmin karo dhammaan indhaha Soomaaliyeed ee xiiseeya akhriska.

1.3 UJEEDADA MAJALLADA

Indhaha Soomaaliyeed oo in badan dhaayahooda arkayey dhaawac iyo dhib aan dhammaad cayiman lahayn, waxa ay Majalladan ka qeyb qaadan doonta inay dib usoo celiso rajada nololeed, si loo iftiimiyo guulaha aan gaarnay iyo kuwo aan ku raad joogno. Majalladu, waxa ay noqon doonta mid dhallinyarada iyo aqoon-yahanada da'da yar fursad u siin doonta inay kusoo bandhigi karaan hal-abuurkooda, iyaga oo qeyb ka noqonaya dhismaha dadkooda, dalkooda iyo diintooda.

Ujeedada oo aan lasoo koobi karin awgii, haddana Majallada waxay bogga-dhayi doonto indhaha Soomaaliyeed, si la mid ah sidaasina waxa ay indhaha Caalamka u bandhigi doonta Soomaalida iyo xogaha ka daahsoon indhahooda.

GANACSIGA

Ganacsiga waxa uu ka mid yahay astaamaha lagu qiimeeyo ummadaha ku kala nool dunida daafaheeda. Soomaalidu asal ahaan waa dad taarikh fog oo soo jireen ku leh dhinacyo kala duwan.

Dhanka ganacsiga, Soomaalidu waa dad asal ahaan ka ganacsan jiray wax soo saarka beeraha iyo xoolaha nool. Ka hor inta uusan ganacsiga Soomaaliyeed lasoo if-bixin xiriir iyo iskaashi ganacsiyeed oo ka tallaabay dalal kale ee caalamka. Soomaalidu waxa ay diirrada-saareen horumarinta iyo wax soo-saarka gudahooda.

Ka dib xadaaradii Islaamka markii ay soo gaartay xeebaha ganacsi ee dhulkii Soomaaliyeed, waxa halkaasi ka dhashay in la is dhaafsado badeecadaha, halka badeecadahi ugu badnaa ay Soomaalidu dhoofin jirtay ay ahaayeen, geela, lo'da iyo ariga. Waxaana raacsana cudbiga iyo fooxa, waxaana ay Soomaalidu waayahaasi kusoo beddelen jireen badeecadu isugu jira dhar iyo raashiin.

lyada oo aan lasoo koobi karin taarikhda ganacsiyadeed ay lahaayeen dadka Soomaaliyeed. Waxa ay Soomaalidu suuqyada caalamka kusoo kordhiyeen xadaarad ganacsi oo aad u ballaaran, midaasi oo ku dhisneyd inay Soomaalidu abuureen xaalad is-dhexgal bulsho, wada dhaqan iyo isdhaafsiga badeecadaha assaasiga ah.

Waqtiyada dhexe ee gumeystuhu qabsaday dhulki Soomaaliyeed, waxa gabi ahaanba awooda ganacsiyeed la wareegay gumeystayaashi kala duwana ee ka arrimin jiray dhulalka ka dib markii ay curatay dowladdii Rayidka, waxa dib-usoo bilowday ganacsiga suuqa xorta, inkasta oo aysan suurta-gelin in sannadahaasi noqdaan kuwa kor u qaada hal-beega ganacsiga Soomaaliyeed sababo iyo duruufo waayahaasi jiray awgii. Dowladdii Milatariga markii ay ka dhalatay gudaha dalka Soomaaliya, waxa isbeddelay hannaanka ganacsiga Soomaaliyeed oo noqday mid hanti wadaag ah oo maamulka ganacsiga ay gacanta ku haysay dowladda.

SOOMAALIYEED

Sannadahaasi waxa ay dhaliyeen in ganacsiga Soomaaliyeed uu u jiheysto dhanka warshadaha iyo wax soo-saarka dalka oo gaaray heer aad u sarreeya. Waagi baryaaba waxa uu xambaarsan yahay culesyo is xig-xiga Soomaalidu waxa ay galeen xaalad adag ka dib markii ay bur-burtay dowladdii dhexe.

Waqtigaasi ka dib, waxa uu dalku waajahayay xaalad suganti la'aan ah, hassa-yeeshe muddo markii ay ku qaadatay in dadkii Soomaaliyeed garowsadaan in meel lagu kala dhaqaaqo aysan jirin,

waxa dib curdan usoo noqday rajada ganacsiga Soomaaliyeed oo waayahaasi god mugdi ah galay.

Ganacsato Soomaaliyeed oo madax bannaan ayaa curiyey fikrado ganacsiyeed oo baahiyo loo qabay. Waxa intooda badan ay ku guuleysteen inay daboolaan baahiyaha assaasiga ah ee bulsho u baahan yihiin.....

Akhriso bogga xiga



GANACSIGA

Dowladdahii kala dambeeyey ee dhashay ka dib shirkii Carta, waxa ay door ku kala lahaayeen dhisma-ha ganacsiga Soomaaliyeed.
Ugu dambeyn waxa lasoo gaaray xaalad ay dadku baahiyahooda assaasiga ah dhameystiran karaan. Halka geesta kalena ay weli jirto duruufo adag oo ku xeyndaaban ganacsiga Soomaaliyeed.

Wax soo-saarka dalka oo aad u liita iyo warshadaha oo aad ugu yar dal-keenna awgii, waxa weli ganacsiga Soomaaliyeed uu ku tiirsan yahay wax soo-saarka dalalka Shisheeya ee horumariyey wax soo-saarka gudahooda.



SOOMAALIYEED


Taarikhda ganacsiga Soomaaliyeed oo kooban ka dib fariinta maqaalkan uu xambaarsan yahay waa in la garowsado ahmiyada ay leedahay in si wada jir ah diirrada loo saarro wax soo-saarka dalka iyo doorka ay leeyihiin warshadaha.

Ballaayinta lacageed ee ka baxa dalka Soomaaliyeed, haddii loo jiheeyo dhanka tacbashada beeraha, dhaqashada xoolaha nool iyo warshadeynta badeecadaha kala duwan. Waxa hubaal noqon lahaa in isbeddel ganacsiyeed oo la taaban karo uu dhasho si loo yareeyo shaqo la'aanta baahsan loona kobciyo dakhliga guud ee dalka.




Sahal Lite

Consultancy | Training | Strategy



WWW.SAHALLITE.COM

WHAT WE OFFER?



SACAADDA

Primary and Secondary School

Ku soo dhawoow Dugsiga Hoose Dhexe iyo Sare ee Sacaadda oo ka shaqeysa bixinta dhammaan adeeg-yada la xiriira waxbarashada hoose iyo dhexe.

Dugsiga Sacaadda waxay kuu diyaarisay goob ku haboon waxbarashada. sidoo kale waxa uu dugsigu ku shaqeyaa Manhajka guud ee dalka Soomaaliya si looga kaaftoomo Manaahiijta kale.

Nogu soo biir oo nala kobci garaadka ubadkeena Soomaaliyeed.







QAYBTA XIRIIRKA

JAAMACADA HIMILO XAFIISKA XIRIIRKA DADWAYNAHA

+252 619121212

+252 619534988

Hamar-wayne

Mogadishu Somalia

www.sacaaddaschool.so

مدرسة السعادة

SHILLIN DIID

Ganacsigu nooc walba uu yahay casrigan aynu nool nahay waxa uu ku dhisan yahay nidaamka maaliyaddeed ee loo yaqaan lacagta.
Lacagaha la isdhaafsado ganacsiga ayaa kala haga qiimeynta badeecadaha ganacsiga iyo qoondeynta maaliyaddeed ee la is dhaafsan karo. Gudaha dalka waxa ka jira nidaam maaliyaddeed oo lagu ganacsado.

Muddooyinkii ugu dambeyeey hannaanka maaliyaddeed ee ganacsiga dhulka Soomaaliyeed, waxa uu intooda badan lugaha la galay nidaamka maaliyaddeed ee lacaga qalaad (Dollar-ka). Gudaha dhul Soomaaliyeed adiga oo ku sugan, waxa aad ku ganacsanayso waxa laguugu qiimeynaya ma aha Shillin ee waa Dollar.







Dhanka kale waxa kuu muuqanaya in si qasab ah loola wada qabsaday lacagta qalaad ee Dollar-ka dhammaan heerarka ganacsiga.

Inta aan ku gudda jirnay baadi goobka xogaha iyo raadinta macaluumaadka ku aadan ciwaankan,

waxa inooso if-baxay in caqabadaha haysto adeegsiga lacagta Shillin-ka uu yahay duruufo dhowr ah oo is biirsaday, kuwooda ugu weyn waxaa ka mid ah:- Daabacadda lacagta Shillin-ka oo aan loo dhaqaaqin, sicir bararka baahsan ee soo laba kacleeya, sarifka lacagaha qalaad. Waxa duruufahaasi abuureen xaalad ganacsiyeed oo loo yaqaan Shillin-Diid.

Xarumaha ugu badan ee gudaha dalka ku ganacsada qeybahooda ugu badan ma aqbalaan mana qaatan lacaga Shillin-ka duruufaha aan soo sheegnay awgeed. Si naceybka loo qaadey Shillin Soomaaliga looga saaro aagaga ganacsiyadeed, waxa dowladda iyo hor-joogaayasha maamulka dalka looga baahan yahay inay il-dheer raaciyaan xaaladdan hadda tagan si Shillin-Diidka loogu beddelo Dollar-Diid.



DOOLAR



Ciwaanka hore ee Shillin-diid waxa aan kusoo bandhignay xaaladda uu marayo Shillin-ka Soomaaliyeed iyo halka uu kaga jiro ganacsiga gudaha dalka.

Doolar-ka waxa uu door weyn ka ciyaaraya suuqyada ganacsiga Soomaaliyeed ee gudaha iyo dibedda dalka, Doolar-ka waxa uu noqday lacagta qalaad ee ka awoodda badan lacagta waddaniga ee Shillin-ka Soomaaliga

Waxa jira xaqiiqooyin aan la dafiri karin oo ku aadan faa'idada uu keenay adeegsiga Doolar-ka halka geesta kalena uu suuqa ka saaray Shillin Soomaaliga oo gabaabsi si maraya adeegsigiisa. Xaaladdaha noocani oo kale waxa ku jira dalal kala duwan oo ka tirsan caalamka, iyaga oo la dhibaateysan xakameynta iyo isku dheeli tirka lacagaha khalaad iyo mida dalka. Halka dalalka horumaray ay si buuxda ah gacanta uga dhigeen dheeli tirnaanta lacagaha kala duwan, iyada oo lacagta dalkaasi mar walba laga horeysiiyo lacagaha kale marka laga hadlayo dhanka dukaamaysiga iyo ganacsiga.

DOON



Sababaha ugu weyn ee gudaha dhulka Soomaaliyeed loogu adeegto lacagta Doolar-ka, waxa aan kusoo bandhigayna qodobbadan hoose oo ku dhisan cilmi-baaris aan ka sameynay bahda ganacsiga iyo qeybo ka mid ah bulshada Soomaaliyeed ee ku dhaqan gudaha iyo dibedda dalka Soomaaliyeed. Qodobbada inooga soo if-baxay waxaa ka mid ah: -

1. Ma jiro lacag Shillin Soomaaliya oo dhameystiran oo baahi tiri karta xadiga lacageed ee ganacsiyada u baahan yihiin.
2. Waxaa xadidan lacagta Shillin Soomaaliga intiisa bad-qabka ah ee la galin karo ganacsiga.
3. Ma jiro bangiyo, xarumo iyo hannaan lacag diris oo baahsan, lana isla wada qaatay oo u gaar ah Shillin Soomaaliga midaa oo fududeyn karta in lacagta shillin Soomaaliga lagu keydsan karo bangiyada, si fududna loogu kala dirsan mobilada sida haatan loo adeegsado Doolar-ka.

Waxa jira qodobbo hoosaad kale aan halkan lagu soo koobi karin, se' xalku waa in la helo gacan isku dheeli tiri karta Shillin Soomaaliga iyo Lacagaha qalaad oo Doolar-ku u horeeyo. Ficiladaasi waxa intooda badan dejintooda laga sugaya dowladda iyo maamulka markaasi tallada dalka haya halka dhaqan-geliskisana looga baahan yahay guud ahaan dadweynaha Soomaaliyeed gaar ahaan bahda ku jira suuqa ganacsiga xorta ah.



The sudden demise of the celebrated leader PKR leaves the ruling party in a political crisi...

PLAY

Suggested Live TV Channels View All

ZA: SuperSport L... EN: Bein Sports...

View All



StreamNxt

FAMILY ENTERTAINMENT APP

DEGSO OO DAAWO HAL MAALIN FREE AH KA HOR INTA AADAN IIBSAN

StreamNxt

NALA-ARAG

STREAMNXT

FAMILY ENTERTAINMENT APP

SCAN ME
to Download our App

Get it on Google play

Available on the App Store

androidtv

Contact us

Head Quarter
+252614495795
+252611113980

Garowe Office
+252905334488
+252905334488

Email
info@streamnxt.tv
support@streamnxt.tv

Web
www.streamnxt.tv

Follow Us:

- streamnxtapp
- streamnxt
- streamnxt
- streamnxt
- streamnxt1

Youtube= StreamNxtEntertainmentInc

WAX SOO-SAARKA BEERAHA



Beeraha waa isha kowaad ee wax soo-saarka dalka. Dhulka Soomaaliyeed, waa dhul ku habboon tacbashada noocyada kala duwan ee dalaga. Halka cimilo ahaan dhulka Soomaaliyeed uu haysto jawi iskugu jira, kuleyl leh dabaylo dagan iyo qabow leh diirimaad.

Sida aan kasoo xiganay WFP, waxay tilmaamaysa in 65% dhaqaalaha Soomaaliya ku tiirsan yahay wax soo-saarka beeraha. Midaasi oo tilmaamaysa in dadka Soomaaliyeed geesta kale ay aad ugu tiirsan yihiin dhaqashada xoolaha nool oo si toos ah ugu xidhan wax soo-saarka beeraha ee dalka.

Taarirkh fog oo gaareysa boqolaal sanno ka hor, Soomaalidu waxa ay asal ahaanba ka mid ahaayen dadyowga quuta waxa ay soo saartaan. Ha noqoto dalagi ama nafcigi laga helay xoolaha nool.

Waayaha oo isbeddela awgii, waxa isbeddel ku yimid habkii iyo tubtii ay Soomaalidu wax u tacban jirtay, waayahan aynu noolnahay Soomaalidu waxa ay caan ku tahay dalagyada isugu jira Canbaha, Qaraha, Liin dhanaanta, Masagada, Galayda, Qamadiga iyo dalagyada kale ee la halmaala.


Gobollada ku suntan wax soo-saarka beeraha Soomaaliyeed tan iyo markii ay Soomaalidu wax tacban jireen, waxaa ka mid ah: -



Hiiraan, Shabeellooyinka iyo Jubooyinka, Gedo, Baay iyo Bakool. Halka gobollada kale ay yihiin kuwa wax soo-saarkooda sarreeyo lehna fursado ballaaran oo wax lagu tacban karo.

Duruufo kala duwan oo dul hogganaya beeralayda Soomaaliyeed ayaa sabab u noqday inaan la gaarin isku filnaansho iyo wax soo-saar la taaban karo loona dhoofin karo dalalka kale ee caalamka. Haddii la iska kaashado dib u dejinta beeralayda, ka hor taga xaalufinta dhirta, Kobcinta xirfadda iyo aqoonta beeralayda, maal-gelinta dhallinyarada iyo sugida amniga dalka, waxa ay dhalinaysa in bahda beeralaydu ku dhiirradaan wax soo-saarkooda inay laba-jibaaran soo looga kaaftaamo kal-kaal iyo gacan shisheeye is safaf dheer ay u galaan hooyooyin xambaarsan dhallaankooda iyo waayeelo aan fallaaraha qoraxda xamili karin.

DOORKA WARSHADAHA



Horumarka iyo kobaca dhaqaalaha dalalka caalamka, waxa laf-dhabar u ah wax soo-saarka warshadaha. Kaalinta ay ka ciyaaraan warshadaha marka loo qiimeynayo kobaca dhaqaalaha guud ee dalalka waa mid aad u sarreeya oo buuxinaya kaalinta dhaqaale ee dalkaasi. Doorka warshadaha, keliya looma adeegsado horumarinta dhaqaalaha guud ee dalalka sidoo kale waa istiraatijiyad loo dejiyo si loogu kobciyo adeegyada assaasiga ee bulshadu u baahan tahay, tartanka suuqyada caalamiga, sarre u qaadista fursadaha shaqo, abuurista xaalad amni iyo yarenta faqriga iyo gaajada.

Sannadihii u dhaxeeyey 1970-1990, waxa ay indha-ha-Soomaaliyeed marqaati kasoo noqdeen kobaca iyo assaaska warshado kala duwan oo laga hirgeliyey gudaha dalka halka qeybo ka mid ahna lasii horumariyey, warshadihii dalku lahaa waxay tiro ahaan gaarsiisaneed in ka badan 50 warshaddo, waxaana ka mid ahaa:-

1. Warshadda Sonkorta (Jowhar)
2. Warshadda Caanaha (Benaadir)
3. Warshadda Shamentada (Berbera)
4. Warshada Hargaha (Hargeysa)
5. Warshada badarka (Baydhabo)

Warshadahaasi waa kuwa waayah-an dambe aan howl-gelin, waxaa loo baahan yahay in la bilaabo falal dhalin kara in warshaddaha dalka dib loo dayactiro kuwooda bur-burayna dib loo dhiso.

Doorka Warshaddaha waa mid haatan la tabayo, baaqa ku aadan in warshadaha dalka dib loo yagleelo waa bilow ma aha balse waa hayaan soo jiray baahidiisa Majallada indha-ha-Soomaaliyeedna ay sii riixeyso baaqaasi.




JAAMACADA HIMILO

Ku soo dhawoow Jaamacada Himilo oo ka shaqeysa bixinta dhammaan adeegyada la xiriira waxbarashada sare.

Jaamacada Himilo waxay soo saartay kumanaan ka mid ah ardayda Soomaaliyeed ee ku sugan gudaha dalka. Ku soo dhawoow hoyga aqoonta oo aad ka dhaxli doonto xirfad iyo aqoon wax-tar u lahaan doonta Naftaada iyo Qarankaaga.







QAYBTA XIRIIRKA

JAAMACADA HIMILO
XAFIISKA XIRIIRKA DADWAYNAHA

+252 613968797
+252 615400533

JIDKA WADNAHA
MOGADISHU - SOMALIA

WWW.HIMILOUNIVERSITY.EDU.SO

Himilo University
2010
١٤٣١
جامعة هملو

HAYAANKA GANACSIGA SOOMAALIYEED

Taarikhda dheer oo ay ummada Soomaaliyeed ku leeyihiin ganacsiga adduunka, xaaladdo kala duwan iyo mowjado ganacsiyeed oo aan kusoo bandhignay ciwaanada hore ee Majalladan, waxa is weydiintu tahay halkee ayuu kusii jeeda hayaanka ganacsiga Soomaaliyeed?, ka dib in ka badan boqolaalo sanno oo geeddi ganacsiyeed lagu jiray.

Soomaalidu guud ahaan, waxa ay ku guuleysteen inay abuuraan ganacsiyo baaxad leh kuwaa oo ka hirgelay gudaha iyo dibedda dalka. Saadaashu waxa ay muujinaysa in 30-ka sanno ee soo socda ay muuqan karto yididiilo aad u sarreysa oo ku aadan weji cusub oo uu yeelan doono ganacsiga Soomaaliyeed.

Badeecadaha ganacsi ee Soomaalidu baayacdo, waxa intooda ugu badan laga soo dhoofiya dalalka kale ee caalamka, iyada oo taa baddelkeed ay aad u hooseyso badeecadaha dalka laga dhoofiyo, geeddiga ganacsiyeed ee fikirkaasi ku dhisan, waxa muuqanaysa in 30-ka Sanno ee soo socdo laga bixi doono loona guuri doono hab curin cusub oo ku dhisan in dalka gudahiisa laga hirgeliyo warshado iyo xarumo ka shaqeeya wax soo-saarka badeecadaha dalka.

Sida ku xusan baaqyada ay xambaarsan yihiin ciwaanada kala ah (Wax soo-saarka beeraha iyo Doorka warshadaha). Waxa dowladda iyo bahda ganacsatada dalka looga baahan yahay inay yareeyaan maal-gelinada ay ku bixiyaan xarumaha kala duwan ee isugu jira (Hoteelada, Maqaayadaha, Suuqyada, Moolalka) loona jeedsado maal-gelinada beeraha, kheyraadka dabiiciga, kheyraadka badda iyo warshaddaha

Arrintaasi oo si wada jir ah la iskaga kaashado, waxa ay abuuri doonta xaalad suganti ah iyo barwaaqo sooran ah oo ay geli doonan dadka Soomaaliyeed. Si arrinkaasi loo helo waxa lagama maarmaan ah in lagu dhiirado maal-gelinada la xiriira wax soo-saarka halka lagu maal-beeli lahaa maal-gelino badeecaddahooda looga doonayo dalal shisheeye.



Guud ahaan Majalladu, waxa ay bishan xambaarsan tahay fariimo ganacsiyeed oo isbiirsaday, si loo gaaro hiigsiga ah dad iyo dal isku filan oo wax soo-saarka badeecada-hooda loo iib-geeyo dalalka kale ee dunida.

30-Sanno oo bur-bur ah ka dib waxa xiga 30-sanno oo dhisme ah, halka ummadi laga dhisana waxa ugu horeeyo ganacsiga oo abuuraya ilo-dhaqaale oo lagu tiirsanaan karo, loogana bixi karo faqriga, laguna yareyn karo baahiyaha assaasiga ah ee bulshada tirsanay-een muddooyin aad u fog.

BRANDSOM

Digital Print | Design | Media



Shirkadda daabacaadda ee Brand-Som waa shirkad hal abuur sare iyo xirfadba u leh howlaha ay fuliso, ujeeddadeeduna tahay in ay ka qeyb qaadato dhameystirka baahiyaha sii kordheysa ee gudaha iyo dibaddaba gaar ahaan, baahiyaha la xiriira daab-acaaddaha ee ka jira gudaha Soomaaliya, iyada oo la adeegsanayo tiknoolajiyada ugu dambeysa.

Waxaan dammaanad qaadeynaa inaan bixino adeegyo la isku halayn karo, hal abuur leh oo kharash-Maan-gal ah sidoo kalena wata naqshado loo baahan yahay iyo inaan fulino howlaha u dhexeeya kaararka ganac-siga ilaa boorarka. Ugu dambayntii, in qof kasta loola dhaqmo si sharaf, ixti-raam iyo caddaalad ku jirto si aanu u gaadhsiino adeeg/alaabo macaami-isheenna qancin doona.



XAFIISKA XIRIIRKA MACAAMIISHA

619139155

Via-roma, X/weyne

www.brandsom.so

GUNAANAD

Indhaha-Soomaaliyeed waa Majallad bil-le ah, waxa ay u furan tahay dhammaan bahda jecel inay soo bandhigaan hal-abuurkooda qoraaleed. Sidoo kale Majallad-du waxay door muhiim ah ka qaadan doonta soo bandhigista xarumaha ganacsi ee ka jira geyiga Soomaaliyeed.

Si aan hal-abuurkaaga ama fariintaada ganacsi u gaarsiino dadka ku xiran ma-jaladdan. Fadlan nagala soo xiriir: -

+252 619757552/ +252 61 1598081

info@talkwithmajid.com

www.talkwithmajid.com/contact

INDHAHA SOOMAALIYEED

26 April 2023

XIGASHO

Wixii tixraac ah fadlan booqo barta website-ka ee
www.talkwithmajid.com

INDHAHA SOOMAALIYEED
20 April 2023

INDHAHA SOOMAALIYEED

26 April 2023

Soo-Saare

BRANDSOM
Digital Print | Design | Media

TALK WITH MAJID



www.talkwithmajid.com

INDHAHA SOOMAALIYEED
20 April 2023
Vol.1 No.2



www.talkwithmajid.com

BRANDSOM
TALK WITH MAJID